Region Örebro län

# Talo siinta qoyska



Wada noolaasha lamaanaha qoyska ah waxaa macnaheedu yahay inuu ku imaan karo isku dhac intay wada noolyihiin. Markaas waxaad la xiriiri kartaa xafiiska talo siinta qoyska

Hadafkeenu waa inaan si wadajir ah u abuurno fursado wada hadal lagu kalsoonaan karon oo fududeynaaya inuu yimaado isbedel.

## Yaa loogu talo galay?

talo siinta qoyska waxaa loogu talo galay dadka jira 18 sano iyo wixii ka weyn ee ay la soo gudboonaato dhibaatada lamaanaha ama qoyska ama kala guuray ee deggan gobolka Örebro.

## Ballan wada hadal ah sameyso

Qofka yaqaana luuqada Iswiidhishka wuxuu ballan ka sameysan karaa App-ka qaabilaada dhijitaalka ah. Ku soo degso app-ka telefoonkaaga gacanta. Sida hoos ku qoran ayaad sameyn kartaa.

App Store ee iPhone/iPad

Google Play ee android

Qofka aan si fiican u aqoon luuqada Iswiidhishka ballanka waxay ka sameysan karaan iyagoo soo waca talo siinta qoyska. Nambarka telefoonka waa 019-602 74 64.

## Turjubaan

Haddii loo baahnyahay turjubaan soo wac talo siinta qoyska ayagaa ballaminaaya turjubaanka kharashkiisana bixinaaya.

## Baaji ballanka wadahadalka

Haddii aadan imaan karin ballanka wadahadalka waxaa muhiim ah inaa baajiso ballanka.

Ballanka dhijitaalka waxaa lagu baajin karaa dhinaca app-ka *Qaabilaada dhijitaalka* ama Halkaan. Wadahadalka lagu ballansaday telefoon waxaa lagu baajin karaa iyadoo la waco talo siinta qoyska. Wadahadalada 24 saacadood gudahood ah waxaa lagu baaji karaa oo keliya iyadoo la waco talo siinta.

Haddii aad baajiso 24 saacadood gudahood ama aadan imaan adigoo aan iska baajin waxaad bixineysaa 250 karoon oo ah khrashka soo sheegid la'aanta.

Nagu soo dhawaaw!

**Wadahadalkeena**

- Wada hadalka waa ikhtiyaari waxuuna qaadanaa saacad iyo bar
- Kharashka wadahadalka markiiba waa 250 koroon
- Talo siinta qoyska waxay leedahay sir ilaalin buuxda
- Talo siinta qoyska malahan wax diiwaan gelin ah
- Waxaad xaq u leedahay inaa qarsoodi ahaato

**Na soo hel**

Talo siinta qoyska waxay xafiisyo ku leeyihiin Örebro, Hallsberg, Karlskoga iyo Lindesberg.

Örebro: Näbbtorgsgatan 2, dabaqa 2aad, Örebro ku muuji khariidada

Hallsberg: Hasselvägen 1, dabaqa 2aad, Hallsberg ku muuji khariidada

Karlskoga: Bregårdsgatan 1E, Karlskoga ku muuji khariidada

Lindesberg: Kristinavägen 49 C, dabaqa 1aad, Lindesberg ku muuji khariidada